

Khatarta gurigaaga dabka kaymaha ka dib

Somali

Hor u dhac

Guryaha, hoosooyinka, iyo dhismayaasha kale iyo waxyaallaha kale ee ku gubtay dabka kaymaha waxay uga tegi karaan burka iyo dambaska waxyaalla badan oo caafimaadka khatar u ah.

Waxyaallaha khatarta ah oo guriga ku jiri kara waxaa ka mid ah asbestos, dambaska alwaaxyadii gubtay (tusaale, copper chrome arsenate ama 'CCA'), daawooyin, jardiino ama kiimikada beerta, kimikooyinka guud oo kale (tusaale waxyaallaha wax lagu nadiifiyo, kaloriinta barta qubayska iwm), bir ama haraadi kale oo ka yimid qalabka guriga iyo habaas.

Inta aadan booqan gurigaaga (si aad ugula soo baxdo waxyaalla shakhsiyeed ama isku duba ridka hawlo nadiifineed), qadari taxadaradaan soo socda si aad u xafido caafimaadkaaga. Sababa amaan dartood, dadka gelayaa waa inay ahaadaan dad waaweyn keliya.

Ka hor inta aadan goobta

- Waxaa dhici kara inay jirto dhibaato la xiriirta korontada sida koronto 'nool' oo soo dhacday. Ha gelin guriga ilaa lagugula taliyo inuu amaan yahay in sidaas la sameeyo (dad aqoon u leh oo ka socda adeegyada degdega ah, tashiilaadka ama dawlada hoose).
- Saraha iyo dhismayaalku waxaa laga yaabaa in aanay luga ku taagnayn. Sidaas darteed inta aadan isku deyin inaad wax kala soo baxdo ama aad bilawdo nadiifin, ka raadso talo Qaybta Dhismaha ee Golaha degmada si loo xaqiijiyo inay amaan tahay in galo.
- Ogsoonow in dhuxul kulul, shidmaysa iyo waxyaallo kale inay ku qarsoomi karaan burburka. Tusaale ahaan, haddii aad u malaynayso dhismaha gurigu inuu ka kooban yahay xaashiyaha shimidka, samay taxadar siyaada ah markaad gurayso burburka.

Dharka xafidida

- Gasho kabo adag iyo galoofyo adag oo kuwa shaqada ah si ay kaaga xafidaan galaasyada burburay, iyo ku istaagida waxyaalla af leh ama gubtay ama dhuxul shidmaysa.
- Gasho dharka kuwa daboolaya (oo ah gacma dheere ama surweel luga dheer). Haddii uu ku haboon yahay, gasho lebis aadan dib dambe u qaadan doonin aadna iskaga tuurayso goobta shaqada. Shey kasta oo aan la tuurin waa in la dhaqaa ka hor intaan dib loo isticmaalin.

Ka waran qaadashada maaskarada?

- Xaashida maaskarada ah ee caadiga ah, fasaleetiga ama bandannas waxba ma fiiltaraynayaan dambaska iyo habaaska ama firirka asbestoska meesha ku haray. Sidaas darteed guud ahaan kuma fiicna xafidaada sanbabkaaga.
- Maaskarayaal khaas ah (oo loogu yeero 'P1' ama 'P2') waa in la gashadaa si ay u fiiltareeyaan duulduulka asbestos-ka. Waxaa laga helli karaa dhamaan dukaamada dhismaha. Maasaska 'P2' waxay nadiifiyaan qayb aad u badan oo saxarada aan la arki karin marka loo fiirsho 'P1'.
- Gasashada maaskiga waxay adkayn kartaa inaad caadi u neefsato. Haddii aad horay u qabtay xaallad caafimaad oo wadnaha ama sanbabada raadso talo dhakhtar ka hor inta aadan isticmaalin.
- Sidoo kale waa muhiim inaad ogaato maaskiyada noocaan ah wax badan ma taraan haddii uu lingaxa ku wareegsan wajiga iyo madaxu aanay fiicnayn. Ragga garka leh dhibaato ayey ku qabi karaan inay hellaan lingax fiican.

Qaadida qashinka

- Burburka sarta maaha in lagu aaso goobta, ama godad u dhow, maadama alaabada khatarta ah ee ku jirta qashinka laga yaabo inay sumayso dhulka ku meegaaran, dhibna u geysato bay'ada iyo bulshada.
- Ha ku daadin dambas gurigaaga agtiisa, khaasatan haddii asbestos lagu isticmaalay gurigaaga ama dhismayaal kale, ama la gubay alwaax ka mariyey-CCA.
- Xaqiiji inaad qaadata dhar/qalab ku difaacaya ka hor inta aadan wax ka qaban haraaga, dambaska ama qashin kale.
- Ku qoy dambaska biyo si aad hoos ugu dhigto habaaska. Ha u isticmaalin biyaha xoogga ku socda, maadaama ay kicin karaan habaaska/dambaska.

Khatarta Asbestos-ka – ka nadiifi oo gey meesha loogu talagalay

- Guryaha la dhisay ka hor 1988 waxay leeyihiin xaashiyaha shimiitada asbestos cement (ama 'AC') derbiyada, saqafka, dhulka, meelaha furan ama gadaal ka taageeraan fiinaylka dhulka goglan. Xaashiyahaani badanaa khatar caafimaad ma leh haddii aan la goyn, jebin ama la burburin, markaas oo firir ka yimaado.
- Marka dabku kaco, qadar firirka asbestos-ka ah oo hawada gala wuxuu u badan yahay mid hooseeya.

- Marka dab kaco ka dib, firirka waxaa qaadi kara hawada marka shaqo qoditaan ama nadiifini kiciso. Haddii asbestos-ka ay u badan tahay inay gurigaaga ku jirto, waa in qof shati u haysta la hawlgeliyaa si uu u qabto hawsha nadiifinta. Qashinka waa in lagu qaadaa gaari la ansixiyey oo ah EPA waana in loo qaadaa meel lagu daadiyo oo loo ogol EPA.
- Haddii aad joogto marka wax la nadiifinayo gasho maaskiga wajiga 'P2'.
- Haddii waxyaalla ay jiraan asbestos ee goobta yaal aan la gubin, uuna ku egyahay dhowr AC xaashiyood keliya, u laalaab si amaana laba isdulsaaran oo balaastik adag (ama laba baag oo la isdhexgeliyey oo laba bacoood lagu xiray iyadoo la yareeyey ka dhig) dabadeedna ha lagu aaso meel uu ansixiyey Golaha degmada ama Victorian EPA.

Dambaska alwaaxa-CCA-da– nadiifin iyo soo tuurid

- "CCA" waxay u taagan tahay copper chrome arsenate, dhowre ka ilaaliya alwaaxa cayayaanka. Alwaaxa la mariyey CCA-da waxaa badanaa loo isticmaalaa beergolada, dusha sarre, guryaha kala go'go'an, ku dhooqaynta, tiirarka, iradaha, deyrka iyo simida dhulka. Dabka ka dib, dabaska soo haray/dabku wuxuu ka koobmaa ilaa 10% (miisan ahaan) arsenic, copper iyo chromium.
- Carruurta yaryar ayaa u badan inay walxa afkooda geliyaan. Cunida xataa garaamyoo aad yar ayaa khatar noqon kara. Xayawaanka ayaa iyagana lag ayaabaa inay leefaan ama cunaan haraaga dhanaan kaas oo ay ku sumobi karaan. Sidaas darteed, carruurta maribida iyo xayawaanka kale waa inay ka fogaadaan agtiisa ilaa si fiican loo nadiifiyo.
- Dambaska laba bacoood oo la iska kor geliyey ayaa lagu shubaa, la xirayaa dabadeedna la geynayaa halka loogu talagalay. Alwaaxda wax gaareen waa in lagu tuuro halka loogu talagalay. La xirii Golahaaga degmada wixii talo ah iyo wixii iyaga looga baahan yahay ama EPA wixii talo ah oo intaas ka badan oo ku saabsan wixii alwaaxda la mariyey CCA-da u dhimayso bay'ada.

Macluumaad intaas ka badan

Talada caafimaadka ku saabsan qaaca dabka kaymaha ee aad u furnayd ama inay soo gaareen wixii dabku ka tegay, la xiriiir dhakhtarkaaga.

Macluumaad caafimaad oo guud oo ku saabsan asbestos, CCA ama kiimikooyin badan, la xiriiir unuga Bay'ada Caafimaadka ee Wasaarada Adeegyada Aadanaha (DHS) tel: 1300 761 874.

Macluumaad ku saabsan gaadiidka iyo soo qubida waxyaallaha khatarta ah (tusaale asbestos) la xiriiir Victorian EPA (03) 9695 2722 ama 1800 444 004 (lacag la'aan).

Macluumaad ku saabsan si amaana u qaadida burburka dhismaha ama dambaska, taas oo qayb ka ah shaqadaada, la xiriiir WorkSafe Victoria tel (03) 9641 1555 ama 1800 136 089 (lacag la'aan).

Xaashiya kale oo la xiriira dabka kaymaha iyo caafimaadka dadweynaha waxaa ka mid ah: [Bushfire Smoke and Your Health](#), iyo [Advice for people with water tanks living in bushfire affected areas](#). Labadaba waxaa lagala soo bixi karaa www.health.vic.gov.au/environment/emergency_mgmt/index.htm#bushfires ama laga helli karaa Unuga Caafimaadka Bay'ada ee Wasaarada Adeegyada Aadanaha adigoo wacaya 1300 761 874.